# Siyaasadda xaywaanaadka adeega: Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

Markii ay timaado qaadista rakaab wata xaywaanaadka adeega, darawalada ku sugan kaabadda Lyft waa inay hal shay xasuusnaadaan: Had iyo Jeer Dheh Haa. **Sharciga iyo siyaasadda Lyft ayaa ku faraya** inaad qaaddo xaywaanaadka adeega, xataa haddii aad xasaasiyad ka qaadayso, arrimo dhaqan ama diin la xiriiro dartood aad u diidayso, amaba aad ka cabsanayso.

Waanu ognahay xaywaanaada adeega inay xoogaa su'aalaha ku keenaan darawalada Lyft, laakiin dad badan ayaan ka maarmi karin xaywaanaadka adeega. Darawalada Lyft waxay jecel yihiin inaad joogto meel fiican si aad u caawiso dadka qaba xaywaanada adeega inay bulshada dhexdeeda si dhib yaraan ah ugu mushaaxi karto —waad ku mahadsan tahay inaad arrintan si dhab ah u qaadato iyo heeganka aad ugu jirto marka dadku baahida ugu badan u qabaan inay ku raacaan.

**Su'aalaha Inta Badan la waydiiyo Darawalada**

**Waa maxay Xayawaanada adeega?**

Xayawaanada adeega waa xayawaan shaqeeya, ma aha xayawaan la rabbaysto. Xayawaanada adeega waxay maraan tabobar baaxad leh si ay u caawiyaan dadka naafada ah. Waxay ka caawiyaan socodka dadka indhaha la', ku wargeliyaan dadka maqalka la' wixii jabaq ah, ilaaliyaan dadka suuxdinta leh, oo qabtaan hawlo kale oo badan si ay u caawiyaan dadka naafada ah.

Xayawaanada adeega loogama baahna in loo xiro jaan ama koodh ama in la diiwaangeliy. Rakaabka wata Xayawaanada adeega uma baahna inay sitaan wax caddayn ah oo sheegaya in Xayawaanada adeega ay yihiin kuwooda.Si kale haddii loo dhigo, haddii qof rakaab ah oo ey wataa uu sheego in eygu yahay xayawaankiisii u adeegayey, darawalku waa inuu qaado qofka rakaabka ah.

**Qandaraasle madaxbannaan maadaama aan ahay, miyaanan ikhtiyaar u lahayn inaanan oggolaan Xayawaanada adeega?**

Waxaanu u samaynay Lyft dadka jecel dabacsanida iyo xorriyadda, walina halkaa ayaanu taagannahay. Laakiin, xataa qandaraaslayaasha madaxabannaan waa inay raacaan sharciga. Tusaale ahaan, siyaasadda Lyft iyo sharciguba waxay dhigayaan in adiga iyo rakaabkaagu aad xirataan suunka kursiga inta aad gaari u waddo Lyft. Sidaa si la mid ah, siyaasadda Lyft iyo sharciguba waxay dhigayaan inaad oggolaato Xayawaanada adeega.

**Waa maxay waxa ka dhalanaya diidmada qaadista rakaab wata Xayawaanada adeega?**

Haddii darawal diido inuu u adeego qof rakaab ah oo wata Xayawaanada adeega, darawalku wuxuu waajihi karaa shaqo ka joojin dhakhso ah oo abadi ah haddii baaritaanka lagu sameeyo diidmadaasi ay xaqiijiso inay qalad ahayd.

**Maxaan ku ogaan karaa haddii xayawaan yahay mid adeega oo dhab ah? Ka waran haddii aan u maleeyo in qof rakaab ah uu ka been sheegayo eygiisu inuu yahay xayawaan adeega?**

Warka fiicani wuxuu yahay dhacdooyinka ka been sheegidda Xayawaanada adeega ee bulshadeenu waa dhif waxayna kallifi karaan in rakaabka la qaadin. Laakiin haddii aad doonto, waxaad waydiin kartaa laba su'aalood qofka rakaabka ee sheegaya inuu wato Xayawaanada adeega: (1) Miyaad Xayawaanada aad ugu baahan tahay naafonimo? Iyo (2) waa maxay shaqada ama hawsha Xayawaanada lagu tabobaray? Su'aalahani waxay sida caadiga ah kuu caddayn doonaan in Xayawaanada la sheegayo yahay xayawaan adeega.

Haddaba, ma rabno inaad shaqadaada halis ku galiso male-awaal qaldan oon aan sax ahayn. Rakaabka qaar waxay u isticmaalaan Xayawaanada adeega sababo aan caddayn, sida suuxdin ama xaalado wadnaha la xiriira. Xayawaanada adeega oo dhan ma xirtaan jaan, wayna kala qaabab iyo xajmiyo duwan yihiin. Sababahan dartood, waxa ugu wanaagsan inaad oggolaato Xayawaanada marka cidda wadata ee rakaabka ah ay kuu sheegto inay yihiin Xayawaanada adeega.

Haddii aad su'aal ka qabto siyaasadda ama aad jeclaan lahayd inaad soo sheegto qof rakaab ah oo aad ka shakisan tahay inuu ku xadgudbayo siyaasadda, waa inaad la xiriirto qeybta Taageerada Lyft iyo Khadka Tooska ah ee Xayawaanada Adeega **kadib** markii safarku dhammaado.

**Waxaan ahay darawal wata Xayawaanada adeega — sharcigu muxuu ka qabaa?**

Waa siyaasadda Lyft in darawalada loo oggol yahay inay wataan xaywaanadooda adeega. Hase yeeshee, tani waxay yarayn kartaa tirada rakaabka ee aad qaadi karto, waxaana dhici karta in rakaabka qaarkii ayna ku raalli noqon ama xasaasiyad ka qaadaan Xayawaanada adeega oo ay ku waydiistaan inaad baajiso codsigooda. Waxa lagugula talinayaa inaad marka hore wacdo rakaabka oo aad u sheegto inaad wadato Xayawaanada adeega. Haddii rakaabku aanu awoodayn inuu Xayawaanadaada adeega la raaco, waxa waajib ah inaad baajiso safarka si uu u codsan karo darawal kale. Talo xirfadeysan: Haddii codsigu ka yimid meel dhaw, ka bax khadka darawalka muddo kooban si aadan u helin codsiga xiga ee rakaabka.

Si aad u soo sheegto xadgudub lagu sameeyey Siyaasadda Xayawaanada Adeega, wac 1-844-554-1297 ama dooro 'Contact Support' ee app-ka Lyft ama adigoo u maraya Xarunta Caawimada.

**Ka waran Lyft-ga Wadaagga ah? Ka waran haddii qofka ila saaran Lyft-ga la wadaago uu xasaasiyad ka qaado ama aanu oggolayn Xayawaanada adeega?**

Rakaabka codsada Lyft-ga la wadaago waa inay ogaadaan inay u dhawdahay inay bii'ad xiran ay la joogayaan qof kale. Mararka qaar taasi waxay ka dhigan tahay in nasiib kugu hagaajiyo Xayawaanada adeega, si lamid ah inaad kula kulunto wiishka, diyaaradda, ama xafiis yar.

Haddii xasaasiyadda ama diidmada Xayawaanada adeega ay daran tahay, qofka rakaabka ah wuxuu dalban karaa inuu codsado inuu mid kale u wareego. Haddii ay daruuri noqoto, waxaad baajin kartaa safarka qofka aan Xayawaanada adeega wadan adigoo ganaaxaynin. Hadduu aad waligaa dhibaato la kulanto ka darawal ahaan — ama walaacyo kusaabsan darajayntaada — kala xiriir Lyft Xarunta Caawimada waananu ku hagi doonaa kadib marka rakaabku kaa dago.

**Ka waran haddii ayna meeli uga bannaanayn Lyft-ga la wasaago xayawaanka adeega?**

Xayawaanada adeega sida badan waxay fuulaan cagaha qofka leh, markaa uma baahnid kursi dheeraad ah. Haddaba haddii ay dhacdo sidaasi, waxaanu ogaanay in rakaabka kale ay garawshiyo u muujiyaan oo ay meel u banneeyaan haddii loo baahdo. (Ogow: Waa dhif in Lyft-ga la wadaago uu buuxsamo isla marka aad ka hesho codsi qof wata Xayawaanada adeega. Sidoo kale waa dhif inuu ku soo raaco Xayawaanada adeega ugu horraynba.)

**Ma igu waajibbaa inaan qaado xawaanka aan ahayn kuwa adeega?**

Haddii aad waydiiso labada su'aalood ee sare oo qofka rakaabka ahna kuu sheego in xayawaanku aanu ahayn mid adeega, waxaad awood u leedahay inaad baajiso safarka oo qaybta taageeradana aad u sheegto — wax saamayn ah ku yeelan mayso darajayntaada baajinta.

In kastoo aanu kugu boorinayno inaad qaaddo Xayawaanada oo dhan, Xayawaanada loo wato taageerada niyadeed kuma jiraan Siyaasaddayada Xayawaanada Adeega ama sharcigaba markaa waajib kuguma aha inaad u adeegto.

**Waa maxay qaabka ugu wanaagsan ee loo qaado Xayawaanada adeega?**

Dadka rakaabka waxa waajib ah in loo oggolaado inay xayawaankooda haystaan had iyo jeer oo aan laga dalban inay xayawaankooda adeega ku ridaan gadaasha ama huuriga gaadhiga. Xayawaanada adeega qaar badan oo kamid ah waxa loo tabobaraa inay fuulaan gaadhiga ama ay dhulka kursiga dambe ay fadhiistaan. Darawalada qaar waxay jecel yihiin inay qaataan shukumaan ama buste oo ay saaraan kuraasta si ay u ilaaliyaan.
**Sidee ayaan u soo sheegayaa dhibaato uu keenay Xayawaanada adeega?**

Wac Khadka Tooska ah ee Xayawaanada Adeega 1-844-554-1297 waananu ku caawin doonaa. Rakaabka iyo darawalada doorbida inay dhibaato ku soo sheegaan qoraal ahaan, waxay ku soo sheegi karaan mushkiladda app-ka Lyft ama iyagoo u maraya Xarunta Caawimada.

---

## Siyaasadda Xayawaanada Adeega

Sharciga gobolka iyo fadaraalku waxay ka mamnuuceen darawalada bixiya adeegyo gaadiid oo laga diyaariyey App-ka Lyft inay ugu diidaan adeegga dadka rakaabka ah ee wata Xayawaanada adeega Xayawaanadaas dartii, iyo haddii kale inay takooraan rakaabka wata Xayawaanada adeega. Darawalada ku kaca dhaqan takoor iyagoo ku xadgudbaya waajibaadkan sharci waxay lumin doonaan inay isticmaalaan dagalka Lyft.

### I. Waa maxay Xayawaanada adeega?

Xayawaanada adeega waa kuwa loo tababaray inay hawlo u qabtaan qof naafo ah. Waxa jira noocyo badan oo Xayawaanada adeega ah. Xayawaanada adeega intooda badani waa ey. Noocyada caanka ah ee Xayawaanada adeega waxa ka mid ah eyda hagista, kuwaasi oo ka caawiya dadka indhaha la' inay socdaalaan, iyo eyda seenyaalaha, kuwaasi oo ku wargeliya dadka maqalka la' jabaqaha iyaga ku socda. Ma jiro wax shardi ka dhigaya in Xayawaanada adeega xirnaado jaan, la diiwaangaliyey, ama sito nooc caddayn ah oo sheegaysa inuu yahay xayawaan adeega.

### II. Waajibaadyada sharci ee saaran darawalada

Darawalada waxa waajibaad sharci ka saaran yahay inay qaadaan Rakaabka wata Xayawaanada Adeega iyagoon eegayn xasaasiyad, diin, inay ka cabsanayaan Xayawaanada Adeega, ama sabab kale oo kasta oo ayna si cad u oggolaanin ADA. Haddii darawal diido inuu qaado qof wata Xayawaanada adeega Xayawaanada dartii, darawalku wuxuu ku xadgudbay sharciga iyo Qodobada Adeegga ee Lyft ee darawalku oggolaaday.

Darawalku kama codsan karo qofka rakaabka ah caddayn muujinaysa in Xayawaanada uu wataa yahay Xayawaanada adeega. Sharcigu wuxuu dhigaya inay jiraan laba su'aaloo oo kaliya oo darawalku waydiin karo si uu u xaqiijiyoy in Xayawaanada rakaabku wataa yahay Xayawaanada adeega: (1) miyaad Xayawaanada ugu baahan tahay naafonimo? Iyo (2) waa maxay shaqada ama hawsha Xayawaanada lagu tabobaray?

## III. Waxyaalaha ku dhici kara darawalada diida inay qaadaan rakaabka wata Xayawaanada adeega

Haddii Lyft go'aamiso in darawalku isagoo og diiday inuu qaado rakaab wata Xayawaanada adeega Xayawaanada dartii, darawalka waxa si abadi ah looga saaro dagalka Lyft waxaana laga mamnuuci inuu bixiyo adeegga gaadiidka ee laga diyaariyo dagalka Lyft.

Haddii Lyft ay hesho Cabasho Xayawaanada Adeega ah taasi oo si cad ugu eedaynaysa wax ka badan hal mar oo Darawalku uu ama (a) diiday inuu qaado Rakaab wata Xayawaanada Adeega Xayawaanada dartii, ama (b) handaday, dhibaateeyey, ku jeesjeesay, siiyey adeeg liita, ama uu cadaawad u muujiyey Rakaab ama qof kale oo Rakaabka la socda joogitaanka Xayawaanada Adeega dartii, darawalkaasi si abadi ah ayaa looga saari dagalka Lyft.

## IV. Soo sheegidda cabashooyinka Xayawaanada adeega

Rakaabku waxay u soo sheegi karaan mushkiladaha Xayawaanada adeega Lyft, oo ay kujiraan u diididda adeegyada gaadiidka, dhibaataynta, si xun ula dhaqanka, ama khidmadda nadiifinta oo aan sax ahayn. Cabashooyinka waxa la xeraysan karaa iyadoo qoraal ah ama iyadoo la wacayo Khadka Tooska ah ee Xayawaanada Adeega **1-844-554-1297**. Si aad cabasho qoraal ah ugu gudbiso app-ka Lyft: guji "Help" oo ka hoosaysa menu-ga wayn; guji linkiga "Service Animal"; guji badhanka "report a service animal issue". Linki ku gaynaya foomka cabashada ayaa sidoo kale laga heli karaa bogga Xayawaanada Adeega https://help.lyft.com/hc/en-us/articles/214589657-Service-Animal-Policy ama waxa lagu sheegi karaa foomka cabashada ee guud oo kujira https://help.lyft.com/hc/en-us/requests/new.

Lyft ayaa baari doonta cabashooyinka Xayawaanada adeega oo qaadi doonta tallaabo ku habboon oo waafaqsan Qodobada Adeegga Lyft iyo siyaasaddan Xayawaanada adeega. Lyft waxay ku ogaysiin doontaa qofka rakaabka ah natiijada baaritaanka muddo laba toddobaad ah laga bilaabo taariikhda cabashada iyo tallaabooyinka Lyft ay qaadday ama ay qaadi doonto si ay cabashada wax uga qabato.

## V. Xuquuqda rakaabka wata Xayawaanada adeega

Qofka rakaabka adeegga socdaalka loogu diidi maayo inuu wato Xayawaanada adeega. Rakaabka waa loo celin doonaa wixii lacag kaga baxda safarka la baajiyo ama wixii lacag kale ah ee lagu soo rogo sababta loo baajiyey markay tahay darawalka oo qofka diiday inuu qaado Xayawaanada adeega ee uu wato dartii.

Rakaabka waxay Lyft ku wargelin wixii tallaabo ah ee Lyft ay ka qaadayso falka cabashadooda keenay ee ku saabsan takoorka ku salaysan Xayawaanada adeega, oo ay kujiraan haddii Lyft ay xiriirka wada shaqayneed u jartay darawalka arrintan ku kacay.

Lyft waxay siin doontaa rakaab kasta oo soo gudbiyey cabasho Xayawaanada adeega ah oo la rumaysan karo oo la xiriirta takoor uu ku kacay darawal kujira dagalka Lyft ee Maraykanka lacag aan ka yarayn $5 oo uu ku isticmaalo dagalka Lyft.

## VI. Khidmadda nadiifinta

Dadka rakaabka lagama qaadi karo khidmadda nadiifinta ee ah wixii khashin uu keeno xayawaankooda adeega. Dadka rakaabka ah waa loo celin doonaa wixii khidmad looga qaado wixii wasakh ah ee ay keeneen xayawaankooda adeega.

Rakaabka waa laga qaadi karaa khidmadda nadiifinta haddii darawalku keeno caddayn sawir ah oo la rumaysan karo oo muujinaysa in Xayawaanada adeega ee rakaabku wato uu ku kaadiyey, saxarooday, matagay gaadhiga darawalka. Rakaabku dood waa ka keeni karaa in waxani dhacay. Haddii rakaabku dood ka keeno khidmadda nadiifinta, Lyft ayaa qiimayn doonta muranka waxayna go'aan ku gaari muddo laba toddobaad gudahood go’aankaas oo ku aadan haddii loo celinayo lacagta nadiifinta rakaabka iyo haddii kale. Lyft waxay siin doontaa qofka rakaabka ah sharraxaad qoraal ah oo go'aankeeda ah haddii rakaabku ka codsado.